

Oktober
2004

Daryeelka ilmaha iyo Caafimaadka ilmaha Xaashida Macluumaadka waalidka

Barashada muyuusiga ee carruurta yaryar

Carruurta yaryar badankood waxay u ku raaxaystaan muyuusiga si dabiici ah muujiyaan rabitaankiisa. Waxay jecel yihiin inay ku cayaaraan kuna mashquulsanadaan CD-ga iyo cajladaha; codna ka sameeyaan qalabka iyo tooyiska; ku qoslaan kuna hadaaqaan cayaaraha faraha lagu sameeyo waxayna wax ka qaadaan heesaha ay aad u yaqaaniin.

Ka sokow in uu yahay wax lagu raaxaysto, xarakaadka muyuusigu waa u fiican yahay carruurta, wuxuuna ku dhiirigelin karaa waxbarashadooda iyo horumarka luqada, xusuusta iyo maqalka iyo weliba xirfadaha bulsho iyo jireed.

Muyuusigu wuxuu ahaan karaa qayb joogta ah oo ka mid ah xarakaadka maalmeed ee qoyska, cayaarta iyo kooxaha xarakaadyada.

Muyuusiga waa qayb ka mid ah nolol maalmeedka

Waxaa jira dariiqooyin badan oo muyuusigu ku noqon karo qayb ka mid ah nolol maalmeed ee qoyska ee maalmeed, sida lebisashada, waqtiga qubayska iyo seexashada. Heesaha iyo ku luuqayntoodu kuma daran waqti siyaada ah shaqooyinka joogtada ah laakiinse waxay xoojin karaan tayada xarakaadyada.

Waxaad ugu heesi kartaa ilmaha heeso waqtiga hurdada, ama heesa debecsan si loogu sasabo ilmaha caraysan, ama heesaha munaasabadaha laysku salaamo, is-macasalaamaynta iyo kuwa marka safarka la gelayo.

Heeso iyo qaafiyad ayaa la abuur karaa ama la soo amaahan karaa si ay uga tarjunto waxa la qabanayo.

- Sida: here we go round the mulberry bush ayaa la qaadan karaa si ay u buuxiso xaalladaha badankood. Hal qabsigu wuxuu noqonayaa this is the way we ..wash our hands, or put on our hats or pack up our toys. Ku heesida shaqada aad qabanaysaa waxay ka caawimaysaa inay dhisto luqada carruurta iyadoo siinaysa hanaanka luqada ku haboon ee waxa ilmuhu markaas samaynayo.
- This is the way we wash our hands si sahala ayaa loo sii ballaarin karaa qayba kale oo ka mid ah waxyaallaha joogtada loo qabanayo: This is the way we roll up our sleeves... use the soap, ..turn on the tap; and .. dry our hands. Heesuhu badanaa waa ku celcelinta erayada iyo oraaqda, taas oo caawinta koritaanka luqada.
- Carruurta waaweyn, muyuusig ayaa lagu dari karaa dhaqdhaqaaq. Heesta let us go walking, masalan, ayaa la qaadan karaa si loogu daro dariiqooyin kale oo dhaqaaqa sida boodida, orodka, suul-ku socodka iyo dhinacdhinac u socodka.

Muyuusigu wuxuu kaloo bixin karaa waxyaalla aan la soo koobi karin oo carruurta looga caawimayo barashada. Dadka xayeysiiska sameeyaa way ogyihiin in hadalka lagu celcelinayaa caawimo in farriintu ku negaato maskaxa dadka. Sidoo kale, heesuhu waxay noqon karaan kuwa loo isticmaalo xoojinta barashada asaasiga ah sida farbarashada (heesaha xuruufta) iyo tirabarashada (tirinta heesaha).

Heesta oo lagu cayaaro

Carruurta yaryari waxay ku bartaan adduunkooda cayaaraha, sidaas darteedna waxay ka faaiidaystaan fursada ku cayaarida muyuusiga. Carruurta waxay sahamin karaan dhawaaqyada wayna ka aburi karaan iyagoo isticmaalaya qalab sahlan, tooyis dhawaaq samaynaya iyo aallada dhawaaqa samaysa (qalab maalmeedka sida digsigta iyo birdaawaha loo isticmaali karo inuu dhawaaq sameeyo).

Muyuusig koox ahaanta loo sameeyo

Xarakaadyada muyuusiga ayaa iyana ku fiican in koox ahaan loo sameeyo. Marka dadka waaweyni hogaamiyaan carruurta si xarakaad heesood loo wada sameeyo, waxay samayn karaan habcarruurta muyuusiga ku koobiyeyn karto, sida heesida, ku cayaarida qalabka, dhegaysiga iyo abuurida dhawaaqa. Ka qaybgalka dadka waaweyn iyo xamaasadu waxay ku dhiirigelisaa carruurta samaynta aragti wax ku oolla oo ku aadan muyuusiga.



Waxaa taageeray

Dadaalka



SOMALI